Dugsiga Bryn Mawr: Heshiiska Qoyska iyo Dugsiga

Sanad Dugsiyadeedka 2026-2027

Heshiiska Qoyska iyo Dugsigu waa heshiis wada jir ah oo u dhexeeya shaqaalaha dugsiga, qoysaska, iyo ardayda oo muujinaya sida koox kasta ay u wadaagi doonto mas'uuliyadda horumarinta guusha akadeemiyadeed ee ardayda iyo hababka ay dugsiga iyo xubnaha qoysku ku dhisi doonaan oo ku horumarin doonaan iskaashi.

Kani waa ballanqaadkayaga oo ku aadan taageerista guusha ardayda:

HESHIISKA ARDAYGA

Ahaananshaha arday ahaan, waxaan ballanqaadayaa inaan:

- U dhaqanto dadka kale sida aad jeceshahay in laguugu dhaqmo
- Samayso inta ugu fiican oo aadan ka tanaasulin
- Muujiso xushmad dhammaan dadka iyo wax kasta
- Ahaato mid ku habboon dugsiga oo mas'uul ah
- Ahaato mid ammaan ah

HESHIISKA QOYSKA

Ahaananshaha daryeele/qoys ahaan, waxaan ballanqaadayaa inaan:

- U akhriyo oo/ama la akhriyo ilmohayga habeen kasta
- La xiriiro ilmohayga oo ku saabsan maalintooda dugsiga
- Wado oo dhiirrigeliyo waxbarashada ilmohayga meel kasta oo aan joogno
- La xiriiro oo taageero ardayda iyo shaqaalaha
- Waxaan ballanqaadayaa inaan ka qaybgalo fursadaha mutadawacnimada iyo dhacdooyinka dugsiga/qoyska

HESHIISKA BULSHADA

Ahaananshaha xubint ka mid ah bulshada, waxaan ballanqaadayaa inaan:

- Taageero Akhriska Bulshada iyada oo la dhexgalayo bulshada iyo maktabadaha
- Sii wado taageerista qoysaska
- Sameeyo xiriirro bulsho iyo dugsi oo ku saabsan bulshooyinka ay ardaydayadu ku nool yihiin

HESHIISKA SHAQAALAHA

Ahaananshaha shaqaale ahaan, waxaan ballanqaadayaa inaan:

· Taageerno guusha ardayda iyada oo la bixinayo waxbarasho tayo sare leh oo ku dhex jirta jawi waxbarasho oo waxtar leh, soo dhoweyn leh, oo ammaan u ah dhammaan ardayda

· Adeegsanno Manhajka Akhriska Arts & Letters iyo UFLI

· Adeegsanno Manhajka Bridges

· Adeegsanno Manhajka Wayfinder

· Taageerno waxbarashada ardayda ee dhinacyada Maadooyinka Bulshada iyo Sayniska

· Qabanno shirar laba jeer sanad dugsiyadeedka dhexdiisa oo aan siinno qoysaska fursad ay ku jadwaleeyaan shirar inta uu socdo sanad dugsiyadku

· Siinno waalidiinta warbixino joogto ah oo ku saabsan horumarka ubadkooda

· Bixinno fasallo soo dhoweyn leh oo u furan qoysaska iyo daryeelayaasha

· Siinno waalidiinta fursado ay ku mutadawacnimo ku sameeyaan kana qaybqaataan fasalka ubadkooda

· Bixinno turjubaano iyo turjumaada qoraalka oo loogu talagalay qoysaska marka loo baahdo iyo/ama la codsado

_____

Saxiixa Daryeelaha

_____

Saxiixa Macallinka

_____

Saxiixa Maamulaha